

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIA

KOONFUR GALBEED SOOMAALIYA

KULANKA AAYO KATASHIGA KOONFUR GALBEED

WAR-MURTIYEED

12 September 2023

NAIROBI - KENYA

Waxaa magaalada Nairobi lagu qabtay shir socday muddo saddex maalmood ah (10 – 12 September 2023) oo ay ka soo qayb galeen siyaasiyiin mug weyn ku leh siyaasadda Soomaaliya gaar ahaan Koonfur Galbeed, loogana tashaday arrimo ay ka mid yihiin aayaha fog ee KGS, la-dagaallanka khawaarijta iyo fulinta heshiis siyaasadeedkii doorashada ee Febraayo 4, 2023 ka dhacay magaalada Baydhabo.

Falanqayn iyo dood dheer ka dib, waxaa kulanka ka soo baxay qodobada hoos ku xusan:

a) Dagaalka Khawaarijta

1. Waxaa si buuxda loo taageeray, la islana qaatey in la garab is-taago dadaalka ay wado Dawladda Federaalka Soomaaliya oo uu hormuudka u yahay Madaxweynaha JFS Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud kaas oo lagu ciribtirayo khawaarijta.
2. Waxaan tacsi tiiraanyo leh u direynaa qoysaska xubnaha Ciidamada Amniga oo naftooda ku waayey dagaalka lagula jiro khawaarijta. Waxaan

si kal iyo laab ah u bogaadinaynaa guulaha isdaba joogga ah ee Ciidanka XDS iyo kuwa deegaanada ay gaareen iyagoo si naf-hurnimo leh u difaacaya nolosha dadkeena iyo qaranimadeena. Waxaan hormuud u nahay dadaallada kala duwan ee lagula dagaallamayo khawaarijta ayna ugu horeyso ka qaybqaadashada sanduuqa dhaqaale ee lagu taakuleynayo Ciidanka XDS iyo kuwa deegaanada.

3. Iyadoo Dawladda Federaalka Soomaaliya laga codsanayo garab-is-taag buuxa, ayay ka qaybgalayaasha shirka isla qireen in ay lagama-maarmaan tahay billaabidda howlgalka dib-u-xoreynta ee deegaanada KGS, lana abaabulo shacabka deegaanadaas si la mid ah dawlad-goboleedyada kale ee dagaalka khawaarijta uu ka socdo.
4. Maadaama maamulka KGS ee muddo xileedkiisu dhamaadey December 2022 uu ku fashilmay inuu si dhab ah ula dagaallamo khawarijta, kuna guuldareystay abaabulka shacabka, gabbaad siyaasadeedna ka dhigtay khawaarijta, waxaa hoosta laga xariiqay in aan KGS laga xoreyn karin cadowga khawaarijta ilaa laga fuliyo heshiis siyaasadeedkii Febraayo, lana qabto doorasho dimuqraadi ah oo la isla ogol yahay.

b) Meel marinta Heshiis Siyaasadeedkii Baydhabo

1. Nidaamka KGS ee hadda jira wuxuu ku fashilmay una aabba-yeeli waayey inuu u hoggaansamo dhammaan qodobadii lagu heshiiyey Febraayo 4, 2023 oo ay ugu horeeyaan dhowrista xuquuqda dastuuriga ah sida xoriyadda isu-socodka iyo tan hadalka ee muwaadiniinta KGS. Taas bedelkeedana wuxuu ku mashquulsan yahay caburinta, xarigga iyo maquuninta siyaasiinta iyo shacabka ka aragtida duwan.
2. Waxaa la joogaa waqtigii lagu ballamey fulinta heshiiskii Febraayo 4, 2023 ayna tahay waajib qabashada doorasho dimuqraadi ah, daahfuran oo loo dhan yahay kuna dhacda jawi nabadeed, taas oo illaa iyo hadda aan muuqan wax diyaargarow ah, ayna lagama-maarmaan tahay in waqtigeeda lagu qabto.

3. Laga bilaabo 1da Novermber 2023, maamulka heshiis siyaasadeedka ku jooga ee KGS waqtigiisa waa uu dhammaadey, wax door ahna kuma lahaan karo geeddi socodka hirgelinta doorashooyinka aan ka ahayn xuquuq la mid ah kuwa musharaxiinta kale. Maamulka iyo maareynta hirgelinta doorashada waxaa iska leh Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo odayaasha dhaqanka ee rasmiga ah oo latashanaya nabadoonada beelaha iyo qaybaha kala duwan ee bulshada reerka, sida ku cad heshiiskii Baydhabo.
4. Si waafaqsan heshiiskii Baydhabo, Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS waxaa laga dalbanayaa in ay qaadato kaalinteeda una hawlgasho jadwaleynta waqtiga doorashada si aan dib-u-dhac ugu imaanin xulista xildhibaanada Golaha Wakiilada KGS oo loo madlan yahay inay billaabato 1da November 2023.

c) Odayaasha Dhaqanka

1. Waxaan si adag u cambaareynaynaa faragelinta sharci darrada ah ee maamulka KGS uu ku haayo beelaha reer KGS dhexdooda asagoo xilka ka qaadaya, magacaabayana odayaal dhaqan taasoo horseedi karta isku-dhaca beelaha dhexdooda ah. Waxaan cadeynaynaa in falalka noocaas oo sharci darrada ah ee ka danbeeyay heshiiska Baydhabo ay yihiin waxba kama jiraan.
2. Waxaan aqoonsanahay oo keliya odayaasha rasmiga ee ku yimid nidaam waafaqsan xeerka dhaqanka ee beelaha reer Koonfur Galbeed.
3. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee XFS waxaan ku boorinaynaa inay qaataan doorkooda ku aaddan fulinta heshiiskii Febraayo 4 ee Baydhabo, kana hortagaan wax alle wixii wiiqaya maqaamka iyo madax-banaanida oday dhaqameedyada.

d) Baaq

1. Waxaan ugu baaqaynaa Dawladda Federaalka Soomaaliya in ay qaadato mas'uuliyadda ilaalinta iyo fulinta heshiiskii Baydhabo ee ay garwadeenka ka ahaayeen Madaxweynaha JFS Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud iyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Sheekh Aadan Maxamednuur (Madoobe).
2. Sida uu dhigayo Dastuurka KGS iyo heshiiskii Baydhabo, waxaan ku baaqaynaa in si deg deg ah loo dhiso Guddiga xulista xildhibaanada Baarlamaanka 3aad ee KGS, noqdana mid la isla ogol yahay oo ka kooban xubno looqaateen ah, maadaama la joogo waqtigii la billaabi lahaa howlaha doorashada.
3. Waxaan bogaadinaynaa noocyada kala duwan ee ciidamada amniga ee heer Federaal, kuwa deegaanka KGS iyo ATMIS, dadaalka joogtada ah ee ay ku sugayaan amniga shacabkooda, waxaanse uga digaynaa ku milanka arrimaha siyaasadda xilliga kala guurka ee doorashada.
4. Waxaan ugu baaqaynaa dhammaan shacabka reer Koonfur Galbeed in ay u diyaar garoobaan kana qaybqaataan dagaalka lagula jiro khawaarijta ayna garab is-taagaan gulufka ciidanka amniga ee dib u xoreynta dalka gaar ahaan deegaanada KGS.
5. Waxaa u mahadcelinaynaa saaxiibada beesha caalamka ee taageerada joogtada ah siiya Soomaaliya gaar ahaan deegaanada KGS, waxaanna ka codsanaynaa inay kaalinta kaga aaddan ka qaataan doorasho waqtigeeda ku dhacda, dimuqraadi ah oo daahfuran, si waafaqsan Dastuurka KGS iyo heshiiskii Baydhabo ee Febraayo 4, 2023.

Wabillaahi Towfiiq